Gobolka Vestfold

**Heshiis kiraysasho oo ku saabsan bæbar-PC/nettbrett iyo amaahasho agab waxbarasho oo lacag la'aan ah,buugaag iyo waxyaabo  qalab kale oo u dhexeeya**

# Gobolka Vestvold

(ORG.NR.929882385)

(magaca ardayga)-(dhalashada ardayga)

Guud ahaan

1.1 U dhexeeya

Heshiiskani wuxuu u dhexeeyaa  oo wada galay gobolka Vestfold iyo ardayga kiraystay kumbiyuutarka iyo amaahashada qalabka waxbarashada, buugaata iyo qalab kaleba waa lacag la'aan.

Hadii ardaygu aanu ahayn qaangaar,waxaa heshiiska lala gelayaa mas'uulka ardayga kaas oo maas'uul ka noqonaya wixii la kiraystay ama la amaahday.

Markaan saxiixo waxaa xaqiijinayaa in aan akhriyey nuxurka dukumintiga oo aana aqbalay,shuruuda gobolka iyo hab raaca isticmaalka  iyo sida ardaygu ula dhaqmo kumbiyuutarka iyo agabka waxbarasho ee lacag la'aanta ah
Kiraysiga u dhexaysa gobolka iyo ardayga waxaa nidaaminaya  shuruudaha heshiiska.

Heshiiskan waxaa lagu saxiixayaa  si dijitaal ah halkan

https://elevkontrakter.telemarkfylke.no

### 1.2. Xuquuqda hantida/Xuquuqda isticmaalka

Qalabka/agabka waxbarashada/buugaagta uu heshiiskani daboolayo waa hantida maamulka gobolka. Ardaygu waxa uu helayaa oo kaliya xaqa isticmaalka  ilaa ardaygu ka gadanay kombuyutarka oo noqonayo mid  gaar loo leeyahay.

## 2. Kiraysashada bærbar-PC (kumbiyuutarka)

### 2.1. Qalabka kumbiyuutarka  ee heshiisku daboolay

Nidaamka waxaa ka mid ah oo uu daboolayaa Pc/nettbrett/macbook wata jaarjer iyo qalab kale oo dheeraad ah hadii la waxyeelayo ama la lumiyo shuruuda heshiisku wuxuu khuseeyaa sidoo kale kumbiyuutarka la amaahado.

Borogaraamadan soo socda ayaa lagu rakibayaa kaas oo ay weheliyaan nidaamka hawlgalka:

- Barnaamijka kaa taageeraya qoraalka (office365)
- Barnaamijka la dagaalanka feyraska (antivirusprogram)
- Barnaamijyo kale oo iskoolku u isticmaalo waxbarashada

### 2.2. Isticmaalka qalabka

Waxaa waajib ku ah ardayga:

- Waa la hubiyaa in qalabka laga ilaaliyo waxyeelada iyo in la xado (tusaale ahaan lagu xafido khaanad la xiri karo,marka la soo qaadayona boorso lagu rido,lana isticmaalo bac roob,boorso gacmeedna lagu qaado marka la safrayo).
- Cid kale ha amaahin kumbiyuutarka,meelna ha uga tegin iyada oo aan cidi ilaalinayn.
- Ha soo dejin waxyaabaha wax yeeli kara ama borogaraamo kale
- Waxba ha ka bedelin,hana koobiyayn borogaraamada hore loogu diyaariyey kumbiyuutarka iyada oo aadan ogolaansho gaar ah ka haysan iskoolka
- Ku hubi in aad soo koobi garayso waxyaabaha la xiriira dhanka bed- qabka.
- Ha ka titirin calaamaha (noocyada calaamadaha ah,nambarka wershedu ku samaysay iyo wixii la mid ah)
- Adigu wax calaamad ah ha ku samayn mashiinka ama waxyaabaha lagu dhejiyo

Hadii looga shakiyo wax virus ama borograam dhaawici kara ama la arko isticmaal aan caadi ahayn oo kumbiyuutarka ah, waxaa laga xirayaa koontada ardayga. Ardaygu waa in uu la xiriiraa xafiiska kumbiyuutarka si dib laagu hagaajiyo kumbiyuutarka.

Maamulka gobolku waxa uu xaq u leeyahay in uu isticmaalo software si uu ula socdo taraafikada shabakada iyo codsiyada kombayutarka ardayda oo kali ah xilliyada imtixaanada. Ujeeddadu waa in laga hortago qishka oo la ogeysiiyo wax ku saabsan software-ka aan la ansixin ee ku jira kumbiyuutarada ardayga. Xuquuqdan kormeerku waxa ay ku kooban tahay xilliyada imtixaanada mana khusayso wax ka baxsan xiliyadan.

Vestfold FYLKESKOMMUNE

Ardayga lama siinayo xuquuqda maamul ee kumbiyuutarka ilaa iyo inta  la bixinayo lacagtii sadexda sano ee kirada uuna kumbiyuutarku noqonayo mid aad adigu leedahay marka iskooku kuu dhamaado.

Isticmaalka waxa nidaaminaya hab-nidaameedka dugsiyada sare ee gobolka.

## 2.3.Adeegiyo damaanad

Ardayga waxaa waajib ku ah in uu kumbiyuutarka u geeyo shaqaalaha farsamada kumbiyuutarada si loo casriyeeyo,loo saxo,lana hagaajiyo.Hadii ardaygu isaga cid kale uu u ogolaado in ay hagaajiyaan kumbiyuutarka, saamayntu waxay noqon kartaa in garantiga la lumiyo. Taas waxay keeni kartaa in ardaygu dhiibo magdhoow,hadii loo baahdo iskoolku wuxuu ardaygu siin karaa qalabka lagama-maarmaanka ah. Ardayga waa in uu soo sheegaa garantiga ugu danbayn 20 juun,sanad dugsiyadka sadexaad,kadib marka heshiiska la galo,tani waxay kaloo khusaysaa waxyeelada soo gaartay kumbiyuutarka la amaahday.

## 2.4.Khasaare iyo dhaawac

Dhamaan ciladaha qalabka iyo sidoo kale waxyeelada ama lumida waa in lagu wargeliyaa iskoolka sida ugu dhakhsiiyaha badan ugu danbayn 14 maalmood gudohood. Ardaygu waa in aanu isku deyin in uu hagaajiyo waxyeelada, laakiin uu u daayaa iskoolka,Hagaajinta ay samayaan adeegayaal aan la ogolayn waxay keeni kartaa in aan khasaarahaas la daboolin/bixin.

Haddii ay dhacdo dhaawac, waxaad bixin qayb ka mid ah lacagta. Lacagta laga jari karo way kala duwanaan doontaa iyadoo loo eegayo inta uu le'eg yahay khasaaraha.

Khasaaraha ama waxyeeelada ay sabab u tahay dayacaad/taxadar la'aan ama ka yimid dhanka ardayga,waxa bixinaya lacagtaa ardayga/mas'uulka iyada oo dhan,hadii kumbiyuutarka dhaawacmo ama xumaado sababtu tahay soo gaaray ama khasaare. dayacaad ama ujeedo, waa in ardayga/masuulka ardaygu daboolaa dayactirka ama bixiyaa qiimaha haray ee kombuyuutarka si waafaqsan nidaamka maamulka gobolka.

Tusaalooyinka dayacadu waxay noqon karaan sidan (liistadu ma aha mid dhamaystiran):

- Hadii la is kula rido boorsada kumibiyuutarka cabitaan ama dareere
- In aad ku isticmaashid meel aan haboonayn(tusaale ahaan meel ciid ah,dhooqo ah,biyo leh,qalab alxan ama waxyaabo kale oo mashiinka waxyeelayn kara,wershed iyo wixii la mid ah).
- Aad dhigto meel aadan adi ama ardayda kale ilaalinayn

- Hadii waxyeelo soo gaarto marka aad gaadiid saaran tahay
- Hadii waxyeelo ka soo gaarto marka aad dhigto meel aan haboonayn kumbiyuutarka oo adiga ama qof kale ku fariisto
- Hadii aad dhigto meel aan haboonayn tusaale ahaan meel sare ama dhulka ama meel koorna ah iwm.

## 2.5 Xidista

Haii la xado  waa in ardaygu si deg-deg ah ugu war-geliyaa booliska, iskoolkana waa in aad u keentaa nuqul  ah xatooyada.

Hadii Lagu xado meel barayfat ah ama meelaha dadweynaha oo uu ku jiro iskoolku,waxaa mas'uul ka ah ardayga/waalidka adayga,tusaale ahaan waa in ay isticmaalaan caymiskooda,waxaanu ku talinaynaa caymiska xatooyada

## 2.6. Xaqa la wareegitaanka qalabka

## Guud ahaan ku saabsan la wareegidda

Si uu ardaygu ula wareego kumbiyuuraka waa in uu bixiyey kiradii sadexda sano oo uuna dhameeyey iskoolka.
Kadib waxaa loo furayaa kumbiyuutarka, si ardaygu  sida uu rabo u maamusho,shatigaMS windowsa wuu heli karaa markaas ,mana heli doono shatiga qoraalka (office) dhamaan borogaraamada kale oo dhan waa la tirtirayaa.

## Ardayda wadamadu is dhaafsadaan

Ardaygu wuxuu qaadan karaa kumbiyuutarka hadii uu iskool debeda u aado.Maqnaansha ka badan 6 bilood waa in loogu diyaariyaa in loo isticmaalo si khaas ahg(private),ardayguna waa in uu bixiyaa inta ka harsan lacagtii kirada,ardaygu markaas isagaa maamulanaya kumbiyuutarka,kuna soo dejisan kara borogaamka uu u baahan yahay,marka ardaygu dib ugu soo noqodo iskoolka,marka uu soo dhamayso waxbarashdii dibeda waa in ardaygu la soo xiriira iskoolka qaybta qaabilsan kumbiyuutarka si loogu diyaariyo in uu iskoolka u isticmaalo kumbiyuutarka mar kale.

## Ka bedelasha iskoolka

Haadii ardaygu u kala bedesho iskoolaadka dawlada ee gobolka,ardaygu wuxuu kumbiyuutarka u qaadan karkaa iskoolka cusub ee uu bilaabayo.

Hadii ardaygu u bedesho iskool gaar loo leeyahay ama mid dawli ah oo gobol kale ah,waa in heshiiskii kirada ee gobolka la joojiyaa ama la bixiyaa lacagta kirada ee harsan iyada oo la raacayo xuquuqda qawaaniinta ee waxbarashada ama la soo xereeyaa kumbiyuutarka.Ardaygu waa in isagu la xiriiraa iskoolka cusub warbixinaha la xiriira sharciga khuseeya.

## Joojinta iskoolka

Hadii ardaygu joojijiyo inta ka horaysa 1 oktoobar isla dayrta uu heshiiska galay ardaygu xaq uma yeelanayo in uu kumbiyuutarkka qaato,waxaa waajib ku ah in uu dib ugu soo celiyo iskoolka,hadii ardaygu joojiyo inta ka danbaysa1 oktoobar wuu haysanayaa

kumbiyuutarka,waana in lacagta kirada ah ee ku dhiman uu bixiyaa,hadii ardaygu joojiyo 1 oktoobar ka dib oo aanu rabin in uu kumbiyuutarka haysto wuxuu ardagu bixinyaa lacagta kirada ee sanad dugsiyeedka bilaamay.

## Sii wadashada waxbarashada, tusaale ahaan dhisidda waxbarashada guud.

Ardagu wuxu sii isticmaali karaa isla kumbiyuutarkii uu haystey Vg2 kadib hadii uu waxbarashada ka sii wadanayo isla goboka gudihiisa.

Hadii uusan ardaygu haysan kumbiyuutar markiisii hore wuxuu iskoolka ka kiraysan karaa kumbiyuutar isaga oo kiro sanadle ah bixinaya,wuxuu kumbiyuutakana dib ugu soo celinayaa iskoolka marka uu waxbarashada dhamaysto.Ardaygu waa in uu saxeexaa heshiiska kirada.

## 3.Amaahasho qalab waxbarasho,buugaag iyo qalab kale oo lacag la'aan ah

Heshiiskani wuxuu khuseeyaa dhammaan xilli-dugsiyeedka ama hal sannad-dugsiyeedka markiiba si loo helo qalab waxbarasho, buug iyo agab kale oo bilaash ah.

Dhamaan agabka uu ardaygu amaahday waa hantida iskoolka

Vestfold
FYLKESKOMMUNE

Marka iskooka la dhameeyo, maaddooyinka la dhameeyo ama iskookka la joojiyo, dhamaan agabka waxbarashada waa in lagu soo celiyaa iskoolka. Qalabka waxbarashada ee aan la keenin wakhtiga lagu heshiiyey ayaa loo arkaa inay lumeen,qaansheegad ayaa loo diri doonaa ardayga/mas'uulka iyadoo loo eegayo qiimaha hadda uu joogo.

Buugaag kale iyo agabyo kale ayaa si joogto ah loo soo xeraynayaa sannad dugsiyeedka oo dhan, iyadoo la raacayo shuruudaha iyo jadwalka joogtada ah.

## 3.1. Dhamaan amaahashada  waxaa lagu diiwaan gelinyaa nidaamka amaahasahada ardayga ee maktabada.

Wixii la amaahaday oo dhan waa in lagu diiwaan geliyaa nidaamka amaahashada ee ardayga.

Ardayga waxaa waajib ku ah:

- In uu si masuuliyadi ku jirto ula dhaqamo agabka waxbarashada si aana u soo gaarin daal iyo jeexdin aan loo baahnayn.
- Aanu isticmaalin calaamad,hoostaa aanu ka xariiqin qoraalka ama uusan wax ku qorin buugaagta uu amaahatay
- In aad ilaaliso calaamada RFID

### 3.2. Khasaare iyo dhaawac

Hadii la lumiyo ama la waxyeelayo qalabka waxbarashada ardayga/masuulka baa si buuxda masuul uga ah mag-dhawga,mag-dhagaa lagaa dhaafi maayo xitaa hadii aad soo celiso kadib wakhtiga kama danbaynta ah qalabka waxbashada,xaalado gaar ah, qaan-sheegashada waa lagaa dhaafi karaa.

# 4.Lacag bixinta iyo saxiixa

Kumbiyuutarka ardayga, ardaygu waa inuu bixiyaa  si sanadle ah saddex sano. Ardaygu wuxuu u bixinayaa si horumais ah  hal mar sanad dugsiyeedkiiba isaga oo ku bixinaya habka lacag-bixinta elektarooniga ah ee maamulka gobolka. Kiradu waxay u dhigantaa heerka ugu hooseeya ee deeqaha qalabka waxbarashada ee (Lånekassen) waxaana la kordhiyaa sannadkii mar. Hadii ardaygu dhamaysto waxbarasha, ardaygu waxa uu haysan karaa kumbiyuutarka. Haddi ardaygu aanu dhamaysan waxbarashada  ama uu haystey kumbayutarka ardayga wax kayar sadex sano, waa in ardayga loo soo bandhiga in uu iibsado kombayutarka ardayga 3 sano oo kirada ah.

Hadii uu yimaado qaan sheegad la xiriira in ardaygu soo celin waayey agabkii waxbarshada ee lacag la'aanta ahaa,sida buugaagta iyo qalabka kale, ama dayacaad sida waafqsan heshiiska,ardayga waxaa loo soo dirayaa qaan sheegad ,Hadii ardaygu aanu bixin lacagta qaan sheegadka waxaa loo soo dirayaa qoraal xusuusin ah oo ka imaanaya xafiiska qaan sheegdaka (inkasso). Gobolku wuxuu kuu wareejin karaa xaqa qaan sheegadka dhinac kale.

Vestfold
FYLKESKOMMUNE

Ardayda da'doodu ka yar tahay 18 sano jir, masuulka u saxeexay kiraysashada baa masuul ka ah,hadii ay jirto wax lacag ah oo aan la bixini.

## Heshiiska kiraynta laptop-ka/nettbrtt, amaahda agab waxbarasho oo lacag la'aan ah, buugaag iyo agab kale

Waxaan cadaynayaa in aan akhriyey waxa ku qoran dukumintiyadan, Saxiixaygu wuxuu cadaynayaa in aan aqbalay shuruudaha gobolka iyo hab raaca isticmaalka iyo sida ardaygu ula dhaqmo  kumbiyuutarka, shuruudaha iyo tilmaamaha isticmaalida iyo maaraynta agabka waxbarasho ee aad amaahatay.

Xeerarka magdhowga guud ee Norway ayaa khuseeya isticmaalka iyo sida aad u isticmaashid kombiyuutarka. Waxaad si buuxda mas'uul uga tahay magdhow haddii ay dhacdo khasaare, xatooyo ama dhaawac, tan kale hadii ay dhacdo dayacaad, xatooyada ama burburka, ay keentay taxadar la'aan, waxaad bixin qayb lacagta ka mid ah ama hagaajin, ama bedelkiisa keento.

Gobolka Vestfold
Meesha iyo taariikhda: Tønsberg august 2024

Liv Marit Hansen
Maamulaha waxbarshada iyo caafimaadka ilkaha

Vestfold
FYLKESKOMMUNE

**Ardayga iyo ma'uulka**

| **Meesha iyo taariikhda** | **Ka yar 18 sano- waxaa saxiiixaya ma'uulka:** |
|---|---|
| Magaca ardayaga ( ku qor far waaweyn) | Magaca mas'uulka ( ku qor far waaweyn) |
| Saxiixa ardayga | Saxiixa masuulka |